Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay : https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Sibtambar 29, 2021-ka

Ku socota: Hawl wadaagayaasha ODDS iyo Daryeel Bixiyayaasha (Fadlan farriintan la wadaag dadka qaba naafanimada I/DD iyo qoysaskooda)
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Qiyaasta tallaalka COVID-19 ee xoojinta ah

Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka (CDC) ayaa dhawaan oggolaatay qiyaasta xoojinta ah ee tallaalka Pfizer oo loogu talagalay dad gaar ah oo dhammeystay/qaatay qiyaastoodii labaad ee tallaalka Pfizer ugu yaraan lix bilood ka hor.

Qiyaasaha tallaalada ee xoojinta ah waxaa helaya kooxaha soo socda ee dhammeystay/qaatay qiyaastoodii labaad ee tallaalka ugu yaraan lix bilood ka hor:

- Dadka da'doodu tahay 65 jir iyo ka weyn
- Dadka da'doodu tahay 18 jir ee qaba xaalado caafimaad oo hoose (Oregon waxay u tixgelisaa dhammaan naafanimada maskaxda ama korriinku in ay yihiin xaalado caafimaad oo hoose,)
- Dadka da'doodu tahay 18 jir iyo ka weyn ee ka shaqeeya goobo halis sare leh
- Dadka da'doodu tahay 18 jir iyo ka weyn ee ku nool goobo halis sare leh

Oregon dhexdeeda, qiyaasaha tallaalka ee xoojinta ah ayaa hadda laga helayaa oo loogu talagalay dadka ka tirsan qorshaha Wajiga 1a ee qaatay taxanaha Pfizer ugu yaraan lix bilood ka hor. Iyada oo loogu talagalay ODDS, tani waxaa ka mid ah **dadka qaba naafimada maskaxda iyo korriinka, shaqaalaha guryaha koox ahaanta loo degan yahay ee loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweyn ee qab a(I/DD) iyo guryaha daryeelka dadka waayeelka ah ee I/DD, iyo shaqaalaha bixinaya adeegyada guriga-dhexdiisa ee lacagta la isa siiyo ama aan la isa siinin. Waalidiinta, oo ay ku jiraan waalidiinta wax korsanaya, iyo bixiyayaasha daryeelka ee kale ee carruur caafimaad ahaan nugul ama dad waaweyn oo ku nool guriga ayaa sidoo kale u qalma.**

Kuwa qaatay Moderna ama Johnson and Johnson waa in ay sugaan ilaa qiyaasta tallaalka ee xoojinta ah laga oggolaanayo ee loogu talagalay tallaaladaasi, kuwaasi oo la filayo waqti dhow.

Caddeymo caafimaad ayaa muujinaya in dhammaan saddexda tallaal ee COVID-19 ay yihiin kuwo badbaado leh oo waxtar aad ah u leeyihiin ka hortagga jirada daran ee COVID-19 iyo dhimashada. Tallaalka xoojinta ee Pfizer ee lagu taliyay wuxuu joogtaynayaa waxtarka muddada fog ee tallaalka Pfizer, gaar ahaan dadka waaweyn iyo dadka qaba xaalado caafimaad oo hoose.

Haddii aadan weli qaadan tallaalka COVID-19, fadlan qaado tallaalka. Tallaalada COVID-19 waxay muhiim u yihiin ilaalinta dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka, qoysaskooda iyo shaqaalaha taageerada iyo bulshooyinkeena. Labada qiyaasood ee taxanaha ah ee Pfizer ama Moderna iyo hal qiyaas oo ah tallaalka Johnson & Johnson ayaa dhammaantood loogu qalmaa buuxinta shuruudaha tallaalka ee loogu talagalay shaqaalaha daryeelka caafimaadka.

Haddii aad u qalanto qiyaasta tallaalka ee xoojinta ah ee Pfizer, fadlan la xiriir Iskuduwahaaga Adeegyada ama Wakiilkaaga Shakhsiyeed kaasi oo ku saabsan qabashada balan ka jirta mid kasta oo ah xarunta tallaalka oo kuu dhow. Haddii aad awoodi waydo in aad ka baxdo gurigaaga si aad u hesho tallaal, fadlan Iskuduwahaaga Adeegyada ama Wakiilkaaga Shakhsiyeed la socodsii si ay iskugu duwaan qorshe.

Halkan waxaa ku qoran ilo ka socda Maamulka Caafimaadka Oregon:

- Website-ka Ingiriisiga ah
- Website-ka Isbaanishka ah
- War saxaafadeedka Western States oo ku qoran Ingiriisi
- War saxaafadeedka Western States oo ku qoran Isbaanish
- Borotokoolada Nooca Tallaalka (Amarada Taagan)
- Borotokoolka Farmashiyaha
- Su’aalaha Inta Badan La isweydiiyo oo ku qoran Ingiriisi
- Su’aalaha Inta Badan La isweydiiyo oo ku qoran Isbaanish
- Cidda u qalanta kaarka tallaalka xoojinta ah ee warbaahinta bulshada oo ku qoran Ingiriisi
- Cidda u qalanta kaarka tallaalka xoojinta ah ee warbaahinta bulshada oo ku qoran Isbaanish

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa* http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.